UMMAD DULMAN: XEERARKA OAUda IYO UNka WAA QAADE IYO QARSHE.
QORE: ABDURAHMAN HUSSEIN MOHAMED, AMIIRDALDOON, DENMARK 9/11/11

UMMADDA SOOMAALIDA (THE SOMALI NATION) OO LAGU DULMIYEY LAGUNA TUNSIIYEY XEER KU SHEEGA OAUda IYO KAN UNka OO U QARIYEY: (QAADE IYO QARSHE SIDII 2 TUUG 1963).

Xal doonka hadda ka socda Geeska Afrika waa ku meel gaar iyo in la dhimo xanafta dhibka noocyada badan ee ka jira qayb-daleedka loogu yeero Soomaaliya iyo guud ahaan gobolka oo dhammaantood ka dhashay qaybsanaanta Ummadda Soomaalidu ay u qaybsan tahay shantii uu isticmaarku u qaybiyey.

Hadaba waxaa loo baahan yahay in islamarkaanba lagu dhinac wado xalkii joogtada u noqon lahaa mashaakilka ka dhashay dulmigaasi magacaaban. Hadii daacad laga yahay xal u doonka gobolka, maxaa hortaagan in la helo natiijada dadaal kasta? Jawaabtu aniga waxay ila tahay, hadii la yiri nimba hashi ceelka ha keeno, inay tahay iyadoon xalka laga baadi goobeyn halkii uu jirey ee laga soo heli lahaa. Marka hore waa in daacad laga yahay qeexitaanka waxa keenay dhibka jira iyo sida lagu daweyn karo.

**Dhibka jira waxaa keenay :**

1- Shan u kala jarkii Soomaalida ee xilligii isticmaarku uu qaybsanayey Afrika;
2- Xeer ku sheegga Afrika oo doortay inuu muqadas ku sheego dulmi dibadda kaga yimid – waa kala qoqobka ummadaha qaaradda - halkii ay qaaraddu dib u saxan lahayd degaan keeda haddii uu ka tagey kii kala qoqobay;
3- Xeerka ku sheegaasi Afrika oo sidaas ku jabiyey uguna tuntay Xeerka guud ee Dunida, UNka, oo jirey ka hor intaan la samayn kan Afrika oo dalbay in ummadaha dunida oo dhan xorriyad lagu gaarsiiyo midnimo (sidii ay ahaayeen isticmaarkii ka hor), balse taasi uu diidey xeer goboleedka Afrika oo yiri ”MAYA, SIDUU ISTICMAARKU NOO QAYBIYEY WAA MUQADAS AH LAMA TAABTAAN, AFRIKAAN KUNA XALAY-DHALAY AYUU KA NOQDAY WAX KASTA OO KIISAS MA JIRAAN” taasi oo Soomaalida ugu micnaysnayd: Qaadenimo ama tuugnimo loo geystey xaqooda maadaama aan qofka xaqiisa lagu duudsiyi karin tira badnaanta dadka la duudsiyey, run ahaantiina xeer-ku-sheegu wuxuu aflagaado iyo yasitaan dadnimo ku yahay shacabka Afrika oo uu ku sheegay kuwo liita oon dib saxan karin una kala soocan karin wuxuu iskaga khalday isticmaarku, waayo tuug reer u dhacay wax ayuu isku khaldaa markiise uu baxo reerku waa inuu karti u yeesho inuu dib u kala gurto hantidiisa dibna ugu celiyo alaabta halkoodii;
4- UNka oo aqbalay duudsigaasi iyo ku tumashadaasi uu xeer-goboleedku ku tuntay xeerkii guud ee dunida oo dhan kana horreeyey, taasi oo Soomaalida ugu micnaysnayd: Qarshe ama tuugii labaad ee qariyey wixii ama xaqii la soo xaday ama la soo duudsiyey sidaasna labadu ay ku noqdeen QAADE IYO QARSHE, waayo abaarta UNka waxay ahayd inay afti-dadweyne ku xagiijiyaan dadka doonitaankiisa haday daysanayaan sida uu isticmaarku isugu dhex qasay, iyadoo taxadar ahaan ay saxnaan lahayd haday UNku diidaan joogtaynta xuduudadii isticmaarka baqdin laga qabi karo fatan ka dhalata mustaqbalka;
5- SOOMAALIDA oo isku malagtey kuna qaadatay dulmigaasi iyo dulligaasi adoonshey maanta xubin ka noqoshadii iyo saxiixii xeer ku sheegaasi ahaa daalimka ee qaaradda loo nisbeeyey balse ahaa mu’aamarad lagu duudsiyayey ugu horrayn Soomaalida, iyagoon isla markaana aan ku qabsan UNka aqbalaada iyo sharciyeynta xeer-hoosaadka Afrika ee ahaa daalimka, iyadoo waliba markaasi, 1963 ee ahaa sanadkii la dhoodhoobay xeer ku sheega

daalimkaa ee Afrika, uu jirey dacwad ama kiis ka furan UNka oo lagu doonayey in Soomaalida oo dhan midnimo lagu gaarsiiyo xorriyad buuxda.

**Muxuu yahay xalku:**

1- Soomaalida oo OUAda iyo UNka ku dacweysa QAADENIMO IYO QARSHENIMO geysana dacwadaasi maxakamadaha ku haboon sida kuwa xasuuqa dadweynaha, danbiyada dagaalka, xuquuqda aadamiga, iyo intii lamida, sidaasna dib loogu furo agendihii horyiil UNka markii la soo amaamuday/malookeeyey xeerkusheegga OAUda, sidaasna dib loogu gaarsiiyo Ummadda Soomaalida xorriyad buuxda shanta gobolba qaab ah federaal;

2- Gobolka Geeska Afrika (Soomaalida iyo inta la leh xuduudada) oo samaysta suuq barwaaqo sooran ah oo isu furan kaasi oo muwaadin kasta u saamaxaya inuu ka beero fasho ama uu ka kalluumaysto halkuu doono, si xorriyad iyo karaamo leh balse aan lid ku ahayn danta guud iyo midda gaarka ah ee gobolka oo ay kaw ka tahay xaqiijinta qiimaynta nafta shaqsiga iyo sharaftiisa, islamarkaana aan suuqaasi kugudihiisa loo ogolayn wixii shaqsigaasi muwaadinkaa ammaankiisa lid ku ah;

3- Beesha caalamka oo taageerta geedi-socadkaan ah labada tallaabo, amaba ay la timaado beeshu daacadnimada iyo kartida ay u baahan tahay in shucuubta dariska la ah Soomaalida iyo Soomaalida qudeedaba laga dhaadhiciyo in ay taageeraan fulinta labadaasi tallaabo;

4- EUda (waa suuqa midowga Reer Yurub) oo soo gal-fariisiya gumaysteyaashii mashaqadan sameeyey (Ingiriiska, Faransiiska iyo Talyaaniga) si ay u xaqiijiyaan xallinteeda waxay u baahato maalgalin, diblomaasiyad, siyaasad, iwl.;

5- **Vatikaanka/Masiixiyiinta iyo Ururka Islaamka** oo garta in ay arrintu u badan tahay diin maadaam la kala qaybiyey **shacab ah Muslim** oo dhammaan lagu hoos dulleeyey shacab kasta ee daris la ahaa ee ahaa **Masiixiyiin**, sidaasna ay labadoodu wadajir u sameeyaan shucuubta gobolka Geeska Afrika oo dhan macaa Soomaalida laba arrimood:
   a) Waajibnimada diinigaa ee wanaag iyo iskaashi kula noolaansha dariska wax kasta oo ay tahay diintiisu;
   b) Waajibnimada aqoonsiga iyo ku qanacsaanta wuxuu qofka siiyo Allaha uu aaminsan yaha oo ay ku jirto inuu qofka ama dadka dajiyo dhul aan lahayn bad oo ah sida **xagar-oodanka**, maarkaana uusan u hanqal taagin inuu boobo meel kale ee bad leh oo uu Allaah dajiyey dad kale, taasi oo ah cuqdadda iyo cabsida ay kala qabaan shucuubta gobolku oo aysan marna isu aaminayn ilaa la fuliyo labada tallaabo ee hore: wada xorraynta iyo wada midaynta Soomaalida iyo markas ka dib isu furidda gobolka si munaasiba oo xaqiijinaysa ammaanka iyo sharafta dadka mashruucaba loogu danaynaaayey;

6- Saxaafadda iyo dadka wax qora ama hadla ee gobolka iyo tan dunida oo **subag isu mariya** shacabka gobolka si looga daweeyo is-nacaybka ah artifishalka ama beenta aan ahayn dabiiciga ee kasoo askumay isticmaarkii qaaradaha kale.

Si aad u daalacato qodobada is-burinaaya ee labada xeer-ku-sheeg ee UNka iyo OAUda (haa! Ku-sheeg, maadaama ay labaduba bursan yihiin/null and void by defeating each other after inter-recognition while the OAU one was void ab initio: **ab initio** 1] is a Latin term meaning "from the beginning" and is derived from the Latin ab ("from") + initio, ablative singular of initium ("beginning"), waxaad google ku qortaa: (**THE BETRAYAL OF THE SOMAI NATION AND THE HORN).**

**amiirdaljire@hotmail.com**